

Credit-ka Oregon Kids



Ma u qalantaa inaad
dalbato lacag loogu
talagalay
qoyskaaga?

Haddii aad haysato
\$30,000 ama ka yar oo
dhakhli ah, waxaad heli
kartaa ilaa \$1,000 ilmihiiba
oo loogu talagalay ilaa
shan carruur ah oo jirta
shan sano ama ka yar.

Ogow
Waxyaabo
Dheeraad ah



WAC

2-1-1

It's All Free



Waxaa sidoo kale dhici karta in aad u qalanto lacagaha canshuurta lagu xisaabiyo 'credits' oo dheeraad ah.

Marka lagu daro Credit-ka Oregon Kids ee cusub, gobolka iyo Adeegyada Dakhliga Hoose waxay bixiyaan lacagaha canshuurta lagu xisaabiyo oo badan oo loogu talagalay qoysaska leh dakhli hoose ilaa mid dhexdhexaadka ah. Lacagahani canshuuraha lagu xisaabiyo 'credits' ayaa qayb ahaan ama si buuxda la iskugu soo celin karaa, markaa qaybta lacagta canshuurta lagu xisaabiyo 'credit' ee ka badan waxa lagugu leeyahay ayaa lagu soo celin karaa. Xataa dadka aan lagu lahayn wax canshuur ah waxay dalban karaan lacagahani canshuuraha lagu xisaabiyo 'credits' haddii ay xareeyaan canshuur celin.



Lacagta Dhakhliga Shaqada Ee La Xisaabiyo ee Federaalka

Lacagta Dhakhliga Shaqada Ee La Xisaabiyo (EITC) waa lacagta canshuurta lagu xisaabiyo 'credit' ee federaalka oo shaqaalaha leh dakhli hoose ilaa mid dhexdhexaadka ah ka caawisa in ay helaan faa'iidada canshuurta. Haddii aad u qalanto, waxaad lacagta canshuurta lagu xisaabiyo 'credit' u isticmaali kartaa canshuuraha lagugu leeyahay – waxaana dhici karta in ay kordhiso lacag soo celintaada.



Dhakhliga Shaqada Ee La Xisaabiyo ee Oregon

Haddii aad u qalanto EITC ee federaalka, waxaad sidoo kale dalban kartaa dhakhliga shaqada ee la xisaabiyo ee Oregon (EIC). Haddii aad leedahay qof kugu tiirsan oo ka yar 3 sano marka la gaaro dhammaadka sanad canshuureedka, Oregon EIC-gaagu waa boqolkiiba 12 oo ah EIC-gaaga federaalka; haddii kale EIC-gaagu waa boqolkiiba 9 oo ah EIC-gaaga federaalka. Laga bilaabo sanad canshuureedka 2022, waxaad hadda dalban kartaa Oregon EIC adiga oo isticmaalaya lambarrada aqoonsiga canshuurta ee shakhsiga (ITIN-yada).



Guriga Qoyska Shaqeynaya iyo Credit-ka Daryeelka Qof Wax ku tiirsan

Guriga qoyska shaqeynaya iyo credit-ka daryeelka qof wax ku tiirsan (WFHDC) waa lacagta canshuurta lagu xisaabiyo 'credit' oo qoysaska leh dakhli hoose ilaa mid dhexdhexaadka ah ka caawisa in ay iska bixiyaan lacagta daryeelka dadka ku tiirsan inta ay shaqeynayaan, raadinayaan shaqo ama dhiganayaan dugsi.

Si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah oo aad u hesho caawimaada degaanka ee xaraynta canshuurahaaga oo lacag la'aan ah wac 211 Info adiga oo wacaya 2-1-1; zip code-kaaga fariin telefoonka ugu dir 898211 (TEXT211); ama email u dir help@211info.org.